

Dib-u-eegista Qabyo-qoraalka EIS

Dhanka shabakadda (khadka internets ah): wsblink.participate.online

Qabyo-qoraalka EIS

Diiwaan dhammaystiran



Soo Koobidda Hogaanka (Fulinta)

Macluumaadka muhiimka ah iyo waxa laga qaadanayo



Daabacaad ahaan:

Soo koobidda Fulinta iyo kaydiyaha lafta ah ee dokumentiga Qabyo-qoraalka EIS waa lacag la'aan. Nuqulada daabacan ee Qabyo-qoraalka EIS waxaad ku helaysaa \$25. Nuqulada daabacan ee Warbixinta Farsamada leh waxaad ku helaysaa \$15 kiiba.



Si aad u codsato nuqul daabacan ama kaydiyaha lafta ah:

Kala xiriir Dominique Jones 206-689-4783 ama dominique.jones@soundtransit.org.

Goob bulshadu ka akhrisan karto:

Ballard Library 5614 22nd Ave. NW, Seattle

Burien Library 400 SW 152nd St., Burien

Beacon Hill Library 2821 Beacon Ave. S, Seattle

Central Library 1000 4th Ave., Seattle

Columbia City Library 4721 Rainier Ave. S, Seattle

Delridge Library 5423 Delridge Way SW, Seattle

Fremont Library 731 N 35th St., Seattle

Greenwood Library

8016 Greenwood Ave. N, Seattle

High Point Library 3411 SW Raymond St., Seattle

Chinatown-International District Library

713 8th Ave. S, Seattle

Xarun bulsho ama urur:

Alliance for Pioneer Square

105 S Main St., Suite 201, Seattle

Delridge Neighborhoods Development Association, Youngstown Cultural Arts Center

4408 Delridge Way SW, Seattle

Seattle Chinatown International District Preservation and Development Authority

Hing Hay Coworks, 409 Maynard Ave. S, Seattle

Laga heli karo Xarunta maamulka

Sound Transit

Sound Transit, 401 S. Jackson St., Seattle, WA 98104

Ama wac 206-398-5344 laga bilaabo 8deeda aroornimo. ilaa 5 galabnimo, Isniin – Jimce si aad u samaysato ballan.

Magnolia Library 2801 34th Ave. W, Seattle

New Holly Library 7058 32nd Ave. S, Seattle

Queen Anne Library 400 W Garfield St., Seattle

Rainier Beach Library 9125 Rainier Ave. S, Seattle

Southwest Library 9010 35th Ave. SW, Seattle

University of Washington Suzzallo Library

4000 15th Ave. NE, Seattle

West Seattle Library 2306 42nd Ave. SW, Seattle

White Center Library 1409 107th St., Seattle



Sidee faallo looga bixiyaa

Soo gudbi faaladaada illaa **Abriil 28, 2022.**

90-ka maalmood ee mudada faalada Qabyo-qoraalka ee EIS waa laga bilaabo Janaayo 28 illaa Abriil 28, 2022. Markii dib loo eego Qabyo-qoraalka EIS iyo faalooyinka hay'adaha lamaanayaasha ah iyo dadweynaha, Golaha Sound Transit ayaa xaqiijin doona ama wax ka beddeli doona xulashooyinka la doorbiday wixii dambe oo qiimayn ah ee EIS ta kama dambays ah.

Dhanka shabakadda (khadka internets ah): wsblink.participate.online/#comment-now

Kulamada dadweynaha ee Fogaan-aragga ah

Kulan kasta oo dadweynaha waxaa ku jiri doona bandhig, kulan (fadhi) Su'aalo iyo Jawaabo ah iyo markaati afka ah oo uu qabanayo wariye maxkamadeed.

Ka baadi doon isku-xirada fadhiga
wsblink.participate.online.

Qaybta Interbay/Ballard:

Talaado, Mars 15, 5:30-7:30 PM

Qaybta magaalada dhexe (Downtown):

Talaado, Mars 22, 5:30-7:30 PM

Qaybta Chinatown-International District iyo SODO:

khamiis, Mars 24, 5:30-7:30 PM

Qaybta West Seattle/Duwamish:

Arbaco, March 30, 5:30-7:30 PM

Iimayl:

WSBLEDEIScomments@soundtransit.org

Fariinta codka ah: 800-471-0879



Faalooyinka waxaa lagu qori karaa luqad kasta.

Waanu tarjumaynaa faalooyinka la helay mid kastoo ka mid ah qaababka aan kor ku soo sheegnay.

Maxaa xigaya?

Iyadoo ay saldhig u tahay falanqaynta Qabyo-qoraalka EIS iyo faalooyinka laga helay dadweynaha, Golaha Sound Transit waxa ay tilmaami doonaan xulashooyinka la doorbidey* sanadkaan dabayaaqadiisa. Xulashada la doorbidey iyo xulashooyinka kale ee Qabyo-qoraalka EIS, oo ay weheliyaan jawaabaha faalooyinka laga bixiyay Qabyo-qoraalka EIS, waxaa lagu dari doonaa EIS ka kama dambaysta ah. Markaas ka dib Golaha Sound Transit waxa uu dooran doonaa mashruuca la dhisi doono.

* Xulashada la doorbidey waxay muujinayaa "doorbidid" xulashooyinka kale mase ahan go'aankii ugu dambeeyay ama mid ay ku khasban yihiin. Go'aanka kama dambaysta ah ee jidka iyo boosteejooyinka (astanada) la dhisayo lama samaynayo illaa la daabaco EIS ka kama dambaysta ah.

Ka qaybgal fadhiyada furan

Caabuqa caalamiga ah ee COVID-19 dartiis, waxaan diyaarinaynaa fursado fogaan-arag ah oo kala gedisan oo aad nagula hawlgali kartaan annagoo ilaalinayna caafimaadka iyo ammaanka bulshada. Waxaan kale oo aan bixinaynaa qof ahaan fadhi u furan cidda u baahan caawinaad dheeraad ah ama doonaysa in ay nagula hawlgalaan dhanka shabakadda (Khadka internetka).

Mashruuca oo dhammaystiran iyo dhammaan boosteejooyinka (astanada) la soo jeediyay:

Khamiis, Maarso 17, 12-7 PM

Union Station, 401 S Jackson St.

Seattle WA 98104

*Kulanka qof ahaaneed waxa ay ku xiran tahay tilmaamaha dawlad goboleed ama deegaan ee la xiriira kala fogaanta bulshada caabuqa COVID-19 dartiis. Haddii dhacdada qof ahaaneed aan la qaban Karin walaac laga qabo COVID-19 dartiis, waxaa booskeeda la qabanayaa dhacdo fogaan-arag ah. Si aad u xaqiijiso soo wac 206-903-7229 ama booqo wsblink.participate.online wixii isbedel ah.

Boostada:

WSBLE Draft Environmental Impact

Statement Comments

c/o Lauren Swift

401 S. Jackson St., Seattle, WA 98104

Faalooyinka qoran ama iimaylka lagu soo diro waa inay ku jiraan magaca qofka faalooyinka soo gudbinaya iyo ciwaanka soo celinta.



Hagaha akhristayaasha ee Bayaanka Qabyo-qoraalka Saameynta Deegaanka (Draft EIS)

Ku saabsan mashruuca

Ballaarinta Isku-xirka ee West Seattle iyo Ballard waxaa uu keenayaa isku-xir meelaha xoogga loo degan yahay iyo goobaha shaqada ee gobolka oo dhan oo light rail degdeg ah oo la isku halayn karo. Intaas waxaa dheer, taanalka tareenka fudud ee Seattle waxuu uu keeni doono awood siinta dhammaan habka gobolka oo dhan inuu u hawl galo si hufan. Labadaas Isku-xir ee light rail oo la ballaarinayo waxa ay qayb ka yihiin kordhinta habka isu-socodka ee gobolka oo ay ansixiyeen cod bixiyeyaashu November 2016.

Waa maxay EIS?

Qabyo-qoraalka EIS ee mashruuca Ballaarinta Isku-xirka West Seattle and Ballard waxaa loo sameeyay in ay caawinto Sound Transit, sidoo kale hay'adaha ku lamaan iyo dadweynaha, in ay si wanaagsan u fahmaan saamaynta suurtagalka ah iyo faa'iidooyinka mashruuca.

Qabyo-qoraalka EIS:

- Waxa uu tilmaamayaa xulashooyinka (doorashooyinka) ee laga tashanayo.
- Waxa uu qeexayaa saamaynta suurtagalka ah ee deegaan iyo faa'iidooyinka xulasho kastaba.
- Waxuu soo jeedinayaa tallaabooyinka yarayn kara saamayntiisa.

Dib-u-eegayaa iyo faalo ka bixinayaa Qabyo-qoraalka EIS illaa Abriil 28, 2022:



wsblink.participate.online



401 S. Jackson St. | Seattle, WA 98104
800-201-4900 / TTY: 711 | main@soundtransit.org | soundtransit.org



Nuxurka Qabyo-qoraalka EIS

Xulashooyinka la doorbidey iyo natiijooyinka falanqaynta dukumentiga Qabyo-qoraalka ah ee la sameeyay laga soo bilaabo May 2019 illaa Dhiseembar 2021. Waxa ay ka kooban tahay soo koobidda fulinta, lix cutub iyo labaatan lifaaq ee mowduucyada hoos lagu qeexay.

Soo Koobidda Fulinta:

Waxa ay si kooban u sharaxaysaa mashruuca. Waxa ay qeexaysaa goobta mashruuca, xulashooyinka mashruuca, jadwalka, iyo waxa kale uu soo koobayaa saamaynta bulshada iyo deegaanka kuwaas oo lagu qeexay si faahfaahsan Qabyo-qoraalka dhammaystiran.

Cutubka 1 Ujeedada iyo baahida:

Waxa uu faahfaahinayaa waa maxay dhibaatooyinka mashruucu xalinayo iyo sababta maalgelinta mashruuca gaadiidkan loogu baahan yahay.

Cutubka 2 Khiyaaradka la Tixgeliyay:

Waxa uu qeexayaa xulashooyinka lagu qiimeeyay Qabyo-qoraalka EIS, oo ay ka mid yihiin isku toosinta iyo goobaha boosteejooyinka ku yaaliin, sida loo dhisayo iyo inta dhismuhu qaadanayo.

Cutubka 3 Gaadiidka:

Waxa uu soo bandhigayaaa falanqaynta habka gaadiidka ka jira goobta mashruuca, iyo isagoo ka doodaya xoogga saameynta ee xulashooyinka ku samaynayaan xarumaha gobolka iyo hawlaha socdaalka iyo gaadiidka xilliga dhismaha iyo marka uu shaqo bilaababa. Waxa uu ka hadlayaa raacitaanka xulasho kasta iyo kan lugeeya iyo kan baaskiilka wata u furnaanta ay u leeyihiin goob kasta oo boosteejo ah. Cutubkaan waxa uu u qaybsan yahay ballaarinta West Seattle iyo ballaarinta Ballard.



Cutubka 4 Natiijooyinka Deegaan:

Waxa ay ka hadlaysaa deegaanka la saameeyay iyo cawaaqibka deegaan ee ka dhalan kara mashruuca iyadoo u qoran mowduuc ahaan iyo qayb kasta oo Ballaarin ah:

- La wareegis, barakicin iyo raritaan
- Isticmaalka dhulka
- Dhaqaalaha
- Saamaynta bulshada, xarumaha bulshada iyo xaafadaha
- Ilaha muuqaalka iyo bilicda
- Tayada hawada iyo gaaska aqalka dhirta lagu koriyo
- Sawaxan iyo gariir
- Nidaamyada deegaanka
- Khayraadka biyaha
- Saamaynta tamarta
- Geology iyo carrada
- Walxaha halista ah
- Goobaha Electromagnetic
- Adeegyada dadweynaha, badbaadada iyo amniga
- Utility
- Qadiimiga iyo kheyraadka taariikhiga ah
- Jardiinooyin iyo meel bannaan
- Qaybta 4(f) agabka

Cutubka 5 Saamaynta Guud:

Waxa ay qeexaysaa saamaynta mashruuca ee il gaar ah, oo lagu daray saamaynta mashruucyadii hore, kuwa hadda socda iyo kuwa mustaqbalka. Qiimaynta saamaynta guud waxa ay muujin kartaa cawaaqibka aan muuqan marka mashruuca goonidiisa loo eego.

Cutubka 6 Qiimaynta Xulashooyinka:

Waxay qiimaynaysaa sida Xulashooyinka Ballaarinta Isku-xirka mashruuca West Seattle iyo Ballard ay u gaarayaan Ujeedooyinkii iyo Baahidii. Waxa ay koobaysaa faa'iidooyinka iyo saamaynta xulasho kasta.

Lifaaqyada badan oo dheeraad ah (A-N), oo ay ku jiraan warbixinaha farsamo ee mashruuca, ayaa la helayaa si dib loogu eego Qabyo-qoraalka EIS.

Qabyo-qoraalka EIS calaamadihiisa tixraaca degdegga ah

Mowduuca	Cutub-Qayb
Xaggee baan ka helayaa guud marka (dulmarka) dukumentiga?	Soo Koobidda Fulinta
Maxaa loogu baahan yahay mashruuca?	1.2
Maxaan uga baahan nahay tanaal(dalluun) kale oo hoos mara bartamaha Seattle?	1.2.2.2
Waa maxay wakhtiga loogu talagalay marxaladaha mashruuca ee hadhay?	1.5.3
Waa maxay xulashooyinka la doorbidey marka la dhinac dhigo xulashooyinka la doorbidey ee daraf saddexaad maalgelinayo?	Cutubka 2
Waxaa maxay xulashooyinka qorshaha ku jiraa?	West Seattle - 2.1.2.1; Ballard - 2.1.2.2
Side baa xulashooyinka loo sameeyay (horumariyay)?	2.5.1
Waa maxay qaybuhu?	2.1.2
Waxaa maxay qaybta ugu yar ee laga shaqayn karo?	2.4.2
Xaggee baan ka heli karaa macluumaadkaa boosteejo (astaa) kasta?	West Seattle - 2.1.2.1; Ballard - 2.1.2.2
Sidee baad u guda gelayaan dhismaha, waana maxay wakhtiga ay qaadanayso hawlaha dhismuhu?	2.6
Waa maxay kharashka hordhaca ah ee mashruucu? Ka warran hawlaha iyo daryeelka (dayactirka)?	2.8
Side baa mashruucaani ka dhigayaa dareenka xaafaddeyda?	West Seattle - 4.2.4; Ballard - 4.3.4
Intee in le'eg oo guryo (hanti) ah ayaa mashruucaani saamaynayaa?	West Seattle - 4.2.1; Ballard - 4.3.1
Ma saamaynayaa mashruucu wa jardiinooyin (beero nasasho) ah iyo goobaha madadaalada?	West Seattle - 4.2.17; Ballard - 4.3.17
Xulasho kasta maxaa bedelkeed ah oo jira?	6.2.2
Waa maxay saaamayn guud (wadareedka) ay leeyihiin marka lagu daro mashaariidka kale?	Cutubka 5
Sidee baan mashruucaani u saamaynayaa bulshooyinka midabka leh iyo dadka dakhligoodu hooseeyo	Lifaaqa G: Cadaaladda Deegaanka
Maxay yihiin xulashooyinka kale ah oo aad eegteen, side baa loo kala soocey?	Lifaaqa M: Soo koobidda horumarta xulashooyinka iyo Habka Qiimayntii Hore



Xaggee baan Anigu ka helayaa macluumaadka...	Cutub-Qayb
Tayada hawada iyo gaaska guryaha dhirta lagu koriyo	West Seattle - 4.2.6; Ballard - 4.3.6
Khayraadka taariikhiga iyo qadiimiga ah	West Seattle - 4.2.16; Ballard - 4.3.16
Dhaqaalaha	West Seattle - 4.2.3; Ballard - 4.3.3
Ilaha khayraadka degaanka	West Seattle - 4.2.9; Ballard - 4.3.9
Saamaynta tamarta	West Seattle - 4.2.10; Ballard - 4.3.10
Juquraafi	West Seattle - 4.2.11; Ballard - 4.3.11
Isticmaalka dhulka	West Seattle - 4.2.2; Ballard - 4.3.2
Sanqadha iyo gariirka	West Seattle - 4.2.7; Ballard - 4.3.7
Beeraha nasashada iyo agabka madadaalada	West Seattle - 4.2.17; Ballard - 4.3.17
Hanti la wareegid, barakicin iyo raritaan meel kale	West Seattle - 4.2.1; Ballard - 4.3.1
Adeegyada dadweynaha, badbaadada iyo amniga	West Seattle - 4.2.14; Ballard - 4.3.14
Saamaynta bulsho, xarumaha bulshada iyo xaafadaha	West Seattle - 4.2.4; Ballard - 4.3.4
Saamaynta gaadiidka	West Seattle - 3; Ballard - 3
Ilaha muuqaalka iyo bilicda	West Seattle - 4.2.5; Ballard - 4.3.5
Ilaha biyaha	West Seattle - 4.2.8; Ballard - 4.3.8

Guulaha Waaweyn ee Mashruuca

Dhammaan wakhtiga mashruuca iyo inta lagu guda jiro guulahan waaweyn, waxaa ka go'an Sound Transit in ay samayso fursado ay kula hawlgelayso bulshada si ay qayb uga noqoto, ay faallo ku bixiyaan, mashruucana wax ka qaabeeyaan. Fursadahaas qaarkood waxaa ka mid ah ka qaybgal fadhigo furan, kulamo xaafadeed, aqoon-is-weydaarsiyo bulsho, warbixin kooban ee bulsho, xiriir busho oo guri guri ah, bandhigyo iyo xaflado. Intaas waxaa dheer, Sound Transit waxa ay kulmisay Kooxda La-talinta Daneeyayaasha iyadoo u dooratay Hogaanka Kooxda inta lagu guda jiray horumarinta xulashooyinka, iyo afar Kooxood oo La-talinta Bulshada in ay ka qayb galaan Qabyo-qoraalka EIS xilliga bulshadu ka faaloonayso.

